July 15, 2020
Qoysaska Sharafta Leh ee HSA,

Waxaan rajeynayaa in qof walbaa uu qaatay xagaaga nabad ah oo caafimaad qaba. Waxaan si aad ah ugu shaqeynay sidii aan ugu sameyn laheyn 'ku laabashada qorshaha iskuulka" ee Dugsiga Dhexe kaas oo isku dheelitira cabashooyinka caafimaadka iyo badbaadada hadafyada waxbarasho ee ardayda. Tani waxay noqon doontaa tii ugu horeysay ee dhowrisgaarsiin bilow ah sanad dugsiyeedka 2020-2021. Fadlan si taxaddar leh u akhri.

Gudoomiyaha ayaa dhawaan soo saaray tilmaamo cusub oo loogu talagalay iskuulada. Waxaan soo gabagabeynaynaa qorshayaasheena si aan u biirino talooyinkaas oo aan abuurno qorshe noo ogolaanaya inaan si fudud ula qabsan karno xaaladaha isu bedelaya inta u dhexeysa hada iyo bilowga dugsiga, iyo sidoo kale sannadka dugsiga oo dhan, hadii loo baahdo. Waxaan sii wadi doonaa cusbooneysiinta qorshaha, waxaana ku soo diri doonaa e-mayl una diri doonaa macluumaadka cusboonaysiinta maadaama aan dhameystirnay. Hada, waxaa jira labo waxyaabood oo muhiim ah oo aad u baahan tahay inaad ogaataan.

1- **Maalinta ugu horeysa ee ardayda school ka imaan la haayeen waa la baddeley.** Maalinta ugu horeysa dugsiga ardayda waxay noqon doontaa Augusto 25, 2020. Jadwal taariikhi ah ayaa lagu soo deraayaa boostada, waxaana lagu soo dhejinaaya ogeysiiska "ConceptSIS iyo schoolka webside kiisa ooh **ms.horizoncolumbus.org** Isbedelkani wuxuu noo oggolaanayaa inaan siino macalimiinta horumarro xirfadeed oo dheeri ah oo la xiriira jawiga waxbarasho ee cusub. Waxayna noo oggolaaneysaa inaan diyaarino qorsheyaal badan oo sida ugu wanaagsan loogu adeegi karo dhamaan ardeydeena duruufaha gaarka ah ee maanta abuuray fayreska COVID19.

2- waxaan bixinaynaa **2nooc oo jawiga waxbarasho ah** bilowga sanad dugsiyeedka 2020-2021. **Waalidiintu waxay u baahan doonaan inay doortaan mid ka mid ah xulashooyinka ardaydooda Horizon ee fasallada 6,7 iyo 8ka dhammaadka luulyo** si dugsiga u qorsheeyo hab haboon. **Iyada oo aan loo eegin nooca xulasho ee la xushay, ardayda oo dhan waxaa lagu qori doonaa iskuulka loo yaqaan "Chrombook" ee iskuulka laga baari doono sanad dugsiyeedka. Hoos waxaa ku yaal 2 ikhtiyaar ee barashada.**

**Ikhtiyaarka A: 100% Barashada tooska ah ee internetka-** ardayda waxay ku bartaan 100% khadka toos ah oo la baray, daawashada casharada la duubay, iyo inay dhameystiraan meeleynta kuqoran guriga Chrombooka-ga. Uma imaan doonaan dhismaha si ay wax u barto. Ardayda doorta ikhtiyaarkan waxay sidoo kale heli doonaan takhasusyo iyo nashaadaadka barashada bulshada iyo shucuurta. Waalidiinta iyo ardayda ayaa heli doona tababar ku saabsan barashada khadka tooska ah. Shaqada waxay u baahan tahay in lagu dhammeeyo jadwal qaabeysan, iyada oo la fiirinayo himilooyinkaas. Ballan ayaa la sameyn doonna si loola kulmo macalimiinta tababarka iyo imtixaanka aasaasiga ah.

**Ikhtiyaarka B: Waxbarida isku-dhafka ah-** waxay ka kooban tahay dhowr maalmood oo ah barashada guriga. Ardayda waxay ku yeelan doonaan fasallo shaqsiyan dugsiga dhawr maalmood usbuucii markay ku jiraan meela fasallo ka yar oo leh taxaddar caafimaad iyo badbaado oo munaasib ah. Taxaddarada dheeriga ah waxaa ka mid ah: kordhinta nadiifiinta, xarumaha fayadhowrka, maaskaro ama gaashaanka wajiga, sahayda oo kooban, iyo hoos u dhaca kala-guurka. Ardayda waxay ku dhammeyn doonaan casharka maalmaha harsan ee tooska ah guriga. Ardayda waxaa lagu meeleyn doonaa maalmaha iskuulka inta lagu jiro maalmaha Isniinta/Talaadada ama Arbacada/Khamiista. 3-da maalmood ee aysan joogin dhismaha, waxaa loo xilsaarayaa shaqo ay ku dhammaystiraan khadka tooska ah waxayna ugu qaybqaadan doonaan qaar ka mid ah howlaha shirweynaha fiidiyowga iyagoo adeegsanaya Zoom. Waalidiinta iyo ardayda ayaa heli doona tababar ku saabsan teknolojiyada iyo waxyaabaha laga filayo barashada isku-dhafka.

Fadlan buuxi warqadda ku lifaaqan cunug kasta oo dhigta dugsiga dhexe ee HSA si aad u muujiso jawiga waxbarashado ee aad u rabto ardaygaaga sannad dugsiyeedkan. Ku soo celi xaashidan xafiiska ama cinwaanka ku lifaaqan, bashqad shaabadaysan ama ku tuur xafiiska dugsiga shaqsi ahaan ama ku soo celi foomka oo dhammaystiran emeyl ahaan jgibson@horizoncolumbus.org . Foomamka ayaa loo baahan yahay in la soo celiyo july 30-keeda. Xafiiskeenu wuxuu furan yahay Isniinta-Jimcaha 90ka ilaa 3da galabtii, hadii aad dooratid inaad shaqsi ahaan ugu tagto foomka.

DUGSIYADA CUSUB EE DUGSIGA : Haddii hada kuugu horeyo Dugsi Dhexe, fadlan la soco hadii aad baska fuuleyso sanadkaan oo dhan, waxaad ubaahan doontaa inaad sida ugu dhaqsaha badan ka codsatid busaska schoolka meesha internetka adoo ka galaya. Tan waxaa ku jira arday kasta oo fasalka 6aad ah oo ka soo baxay dugsiga hoose ee HSA Elementary.

Si daacad ah,

Maamule.

*Isbedelka kasta oo ku yimaadda jawiga waxbarasho ee ilmaha (ka guuritaanka onlinka tooska ah ee dugsiga ama dhanka kale) waxay ku xirantahay jiritaanka banaanka deegaanka, waxayna qaadan kartaa dhowr maalmood in dib loo qabsado.

FASLAN LA SOO XIRIIR XAFIISKA INTAAN LA GAARIN KHAMIISTA JULY 30aad. Macluumaadkaaani wuxuu naga caawin doonaa dhammaystirka qorshayaga iyi bixinta tafaasiil dheeraad ah talaabada xigta.

Magaca Ardyga (magaca Hore iyo kan danmbe)_____

Fasalka ee 2020-2021_____Taariikhda,,Dhalashada_____

_____Xulashada Ikhtiyaarka ee barashada - Sanad dugsiyeedka 20-21 ee ilmahayga wax ku baran doonaa: 100% Xulashada onlinka tooska ah ee internetka: ardaydu waxay dhamaystiraan dhamaan nashaadaadka waxbarasho ee guriga iyagoo raacaya jadwal qaabeysan oo leh waqtiyada kama dambeysta ah iyo qaar si gaar ah loogu baahan yahay waqti-gelitaan.

_____Ikhtiyaarka isku-dhafka ah : 2 maalmood oo dugsiga ah iyo 3 maalmood oo wax barasho guriga ah. (Dadaal kasta waxaa loo samayn doonaa in lagu meeleeyo ardaygaaga maalmaha la doorbiday, laakiin tani maahan dammaanad balanta isjadwalka.)

_____Waxaan ka doorbidayaa ardaygayga inuu yimaado dhismaha iskuulka maalinta Arbacada/ Iyo Khamiista
_____ Waxaan dooribidayaa ardaygayga inuu yimaado dhismaha iskuulka maalinta Isniin/Talaado.

**Isku xirka internetka guriga hubi xaalada quseysa ardaygaaga**

_____Ilmahayga guriga ayey ku heestaan internetka.

_____ Waxaan u baahnaan doonaa caawimaad si loo helo adeega internetka ee cunugeyga si aan wax ugu barto qodka.

**ransportation** :_____Ilamhayga waxaa qaadi doona gaari oo dejin doona waalid ama xubin reerka ka mid ah.
_____Ilmahaygu wuxuu u baahan doonaa buska schoolka .(Ardayda ku cusub dhismaha duigsiga Dhexe waxay sameyn doonaan, waxaad ubaahan tahay inaad buuxiso codsi gaadiid oo ah www.ccsoh.us/transportation.aspx)

Parent Signature_____Taariikh_____

HORIZON
SCIENCE ACADEMY
COLUMBUS MIDDLE

2350 Morse Rd. Columbus, OH 43229 | Tel: (614) 428 6564 | Fax: (614) 428 6574 | info@horizoncolumbus.org | ms.horizoncolumbus.org

MANAGED BY CONCEPT SCHOOLS